WardheerNews
NEWS FROM AFAR!

# Tumis Xeeldheer: Xudeydi, Noloshiisii Cuudka & Waayo Kale

**Prof. Axmed I Samatar**
**Turjumid: Cabdiqani Ismaaciil & Cabdicasiis Guudcadde**
**Abril 20, 2020**

---

Wuxuu mudnaanta kala mid yahay qof kasta oo Soomaali ah oo sameeyey wax qarankiisu ku faani karo. Isaga oo weli dheer, dhabarkiisu toosan yahay, tallaabadiisu xooggan tahay, maskaxdiisuna si buuxda u soo jeeddo, cuudyahanka ugu weyn Soomaalida ee hadda nool, Axmed Ismaaciil Xuseen (Xudeydi), waxay da'diisu ku dhawdahay siddeetan sano. Sida ku dhawaad milyan qof oo kale oo dadkiisa ah, wuxuu ka soo qaxay qalalaasaha ka taagan Jamhuuriyadda Soomaaliyeed. Waa 27 Diisember, 2007. Hadda ayaannu dhammaynnay qado macaan oo wakhti dheer qaadatay oo aannu ka cunnay mid ka mid ah hudheellada ugu fiican ee Hindida ee Landhan ku yaalla, kaas oo wax yar u jira Madxafka Biritishka.



Axmed Ismaaciil Xuseen (Xudeydi)

Xudaydi wuxuu burjiga kala mid yahay André Segovia, giitaarlihii Isbaanishka iyo adduunkaba caanka ka ahaa, kaas oo aaladdaas ku daray kaydka muusigga kalaasiigga ah. Haddii Xudeydi uu ka dhalan lahaa waddan intan adduunka uga furan, waxaa loo tixgelin kari lahaa Segovia-ha cuudka—caan, hodan, iyo ka badan…

Qolkayga hoteelka aan deggenahay ayaannu wada fadhinnaa maalin uu deggen yahay jewiga Landhan; mid ka mid ah kabannadiisa ayaana si jacayl leh u saaran laabatadiisa gacanta bidix, gacanta weyn ee caanka ah ee midig faraheeduna waxay u dhaqdhaqaaqayaan inay taabtaan kabanka oo ay hal mar ina geliyaan xaalad isugu dhafan beerqaad iyo dareentaabad.

Waa hubanti in Xudeydi yahay nin hibo leh, cuudyahan xirfad sare leh, kaas oo aan awoodin keliya inuu ka shanqadhiyo xadhkaha cuudka, ha se ahaatee sidoo kale caddeeyey inuu awoodo allifidda heeso yaab leh oo waddani iyo jacaylba ah. Intaa waxa dheer, in aqoonta uu u leeyahay tumista muusiggu ay ka mid tahay kuwa ugu ashaqaraarsan, xaglinba ha noqotee. Haddii la

milicsado nolishiisa faneed, waxa adkaanaysa in awooddiisa farsamo ee caqiibada leh laga sooco dun-wanaaggiisa iyo ka-falcelintiisa cabqarinnimada leh ee xaaladaha ku gedaaman.
Arrintani waxay si gaar ah u soo baxaysaa markaynu eegno sannadihii badnaa ee uu qaxoontiga ahaa, dhaqaale ahaanna liicliicayey. Waxa laga yaabaa astaamaha kore inay yihiin qayb ka mid ah tayadiisa qofeed.

Xudeydi wuxuu marti rasmi ah ka ahaa Machadka Macalester xagaagii 2004, kolkii isaga, oo ay weheliyaan fannaaniin kale, sida Faadumo Qaasim Hilowle iyo Cabdinuur Allaale, ay si dhammaystiran uga ciyaareen madasha Concert Hall. Intii lagu guda jirey xafladdan Landhan, waxaan jaanis u helay inaan ku qanciyo inuu i soo booqdo oo uu su'aalo door ah iiga jawaabo. Iswaraysiga waxaannu ku yeelannay Af Soomaali.

***

**AIS: Soo dhawoow, Mudane Xudeydi.**

X: Waad mahadsan tahay, Barafasoor Axmed.

**AIS: Intaynnaan hore u socon, erayga Af Soomaaliga ah ee '*fan'* muxuu adiga kaaga dhigan yahay?**

X: Fan wuxuu u taagan yahay waxqabadyo hal-abuur ah, kuwaas oo halkooda ugu xiisabbadan, ama ugu soojiidasho badan, taagan, una qalma in la soo ifbixiyo. Jiritaanka noocan ahi wuxuu filiqsan yahay, marka si weyn loo fiiriyo, laga bilaabo xirfad sare-u-lahaanshaha tumista qalabka muusikada ee foodhida, cuudka, durbaanka; cod fiican ku heesidda; samaynta riwaayadaha iyo maansada; ilaa xaradhka, iyo qoraal wanaagga. Haddii la soo koobo, 'fan' wuxuu noqonayaa hal-abuurnimo tayo sare leh—awood loo bogo, taas oo indhasarcaad ku dhow.

**AIS: Sidee baad ku noqotay cuudyahan?**

X: Laga soo bilaabo kolkii aan aad u yaraa ee aan joogey Cadantii Biritishka [ee Yemen], waan aqaanney inaan xiiso u hayo muusigga. Kol kasta oo aan arko askari boolis ah oo tumaya durbaan, oo gaardiyaya, waan ku carari jirey, daba socon jirey, waxaanan malaysan jirey anigoo noqday mid ka mid ah kuwa durbaanka tumaya. Mawjadaha ayaa i qaadan jirey, aniga oo aan socodka iyo wakhtigaba dareensanayn, ilaa qof qoyska ka mid ahi uu i soo qabto oo guriga i keeno. Kolkii aan iskuulka hoose ku jirey, mar kasta oo aan fursad u helo waxaan miiskayga looxa ah korkiisa ka dhigan jirey durbaan, iyaga oo faraha labadayda gacmoodba sugi kari la' inay tumaan. Waan ku yara fiicnaaday tumista, ardaydii aanu isku fasalka ahaynna way la dhaceen. Dabadeedna arrin aad u muhiima ayaa dhacay: waxaa Cadan yimid nin magaciisa la dhaho Cabdillaahi-Qarshe.

**AIS: Ma waxaad u jeeddaa Qarshihii halyeyga ahaa? Ninkii codadka u sameeyey heesihii hore ee waddaniga ahaa ee ay ka mid ahaayeen '*Qolaba Calankeedu Waa Caynoo'* iyo '*Aqoon La'aani Waa Iftiin La'aan'*?**[1]

X: Haa! Laakiin kolkaas wuu yaraa, caanna ma uu ahayn—caannimaddiisa oo dhammi waxay ahayd sannado farabbadan ka dib. Cadan ayuu ku koray, laakiin wuu ka tagey, sumcad ayuuna kula soo noqday isaga oo 'fannaan' ah. Judhiiba waxaan go'aansaday inaan soo jiito, waxaanan weyddiistey inaan darbuugadda u garaaco kolka uu cuudka tumayo. Markan, Qarshe xirfad badan u ma uu lahayn tumista, laakiin wuxuu ahaa Soomaaligii ugu horreeyey ee halkaa joogey ee si cad oo dhammaystiran u waajaha caqabadda ee, weliba, bilaaba inuu qaado heeso lid ku ah gumeysiga. Si dhakhso ah ayaan ula kulmay. Maalin, annaga oo si caadi ah isaga fadhinna, ayaan bilaabay in aan kabankiisa taataabo, oo aan salsalaaxo. Si dhakhso ah ayuu ii arkay, kabankiina si debecsan ayuu iiga qaaday, dabadeed wuxuu i weyddiiyey wixii uu aabbahay ii iibiyey markaan iskuulka gelayey. Waxaan u sheegay in shayadii la ii gaday ahaayeen buug iyo qalin-qori. Waa arrin fiican, ayuu yidhi Qarshe, laakiin wuxuu sidoo kale ii sheegay in aan iibsado kaban aan ku barbarto. Taladaas laabta ayaan ka qaatay, in yar ka dibna kabankayga ayaan haystey.

Xilligaas muhiimka ahaa, Qarshe wuxuu ii ahaa fure—casharro i ma uu siinnin, laakiin wuxuu igu dhiirrigeliyey, iguna tabaabulsheeyey, in aan barashada bilaabo. Markaa aan kabankayga iibsadey, labadii fannaan ee xirfadda i baray waxay ahaayeen marxuum Cabdi-Afweyne (oo Jabbuutina masrixiyado ka sameeyey) iyo Xasan Nahaari—waa magacyo taariikhda masraxa Soomaalida ku ladhan. Qalabka way soo kiraysan jireen markay u diyaargaroobayaan, ama dhigayaan, masrixiyadda. Maaddaama aan anigu haystey kabankayga ii gaarka ah, waa ay ii baahnaayeen, sidaa awgeed waxaan helay fursado badan oo aan ku tababbarto. Saddex bilood oo 'barasho xooggan' ah ka dib, kalsooni ayaan helay, isaga oo magacayguna noqday mid si badan loola xidhidhiidhiyo qalabka. Waad fahmi kartaa, Axmed, tumidda kabanku waxay aad ugu tiirsan tahay miisaanka habdhaca. Mar kasta oo qofka wax tumaya uu xooggan yahay dareenkiisa hoose ee habdhaca la xidhiidhaa, waa mar kasta oo codkuna wanaagsanaado. Waa taa sirta ku jirtaa.

**AIS: *Habdhac*, maxaa laga wadaa?**

X: Habdhacu dhawr wax ayuu ka kooban yahay, laakiin laba ayaa ugu muhiimsan, siday ila tahay: awoodda tumista iyo wakhtiga ama dhaqaaqa taabashada. Ka hore waa natiijada kulanka aaladda/qalabka iyo xubinta ku habboon ee jidhka banii'aadamka; ka labaadna wuxuu la xidhiidhaa xawaaraha dhaqaaqa. Laakiin middan xasuuso: in kasta oo labaduba marka hore u muuqdaan farsamo, haddana marka la sii wado waxay noqdaan wax aan aad loo arki karin, laakiin soo ifbaxaya, la dareemayo, oo ah khiyaal faneed oo ay adag tahay in la kala sooco.

[1] Faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan noloshii Qarshe ka eeg waraysiga uu Maxamed-Rashiid Sh. Xasan ka qaaday (1994) Marxuun Cabdillaahi-Qarshe oo ku soo baxay majaladda *Bildhaan: An International Journal of Somali Studies, Vol. 2 (2002): 65–83.*

**AIS: Intee in le'eg ayaad Cadan joogtey?**

X: Ilaa intaan doob-gurraan noqonayey. Waa da'aadda shan-iyo-labaatameeyada.

**AIS. Intii u dhaxaysey yaraantaadii iyo doob-gurraannimada, ma marmar uun baad kabanka tumi jirtey, mise waxa kaa go'nayd inaad awooddaada oo dhan u hurto ka-jibbakeenidda aaladda?**

X. Maya, maya! Si toos ah ayaan ugu go'ay, Soomaalidii Cadan joogteyna si weyn bay ii garab istaageen. Xaflad magaaladu u dhammayd oo xilligaa la soo abaabuley, Soomaalidii ayaa igu casuuntey si aan uga qaybgalo. Waxaan ka mid ahaa fannaantii yaryarayd ee loogu yeedhay in ay ka qaybqaataan. Sidaas awgeed, qaar ka mid ah bulshadii Soomaalida ee meesha joogtey ayaa ii keenay laba go' oo cadcad, kuwaas oo ay igu duubeen: mid way ii guntiyeen, ka kalana way ii hullaabeen. Lebbiskan, oo ahaa mid aanan maalintaas ka hor gashan, waxaa la socdey kaba sandhal "faygammuur" ah oo loox ka samaysan iyo masalle (sijaayad harag ka samaysan). Wuxuu, run ahaantii, ahaa muuqaal yaab leh, isla markaasna qurux badan—jaadgooni ay dad badani rumaysnaayeen in uu yahay huga dhabta ah ee Soomaalida. Cuudka ayaa lay dhiibey, waxaanan tumay anigoo suke ah. Bulshooyinkii kale ee tartanka ku jirey waxay meesha ku yimaaddeen koox-muusigeedyo. Gebagabadiina, kolka la isu geeyo lebbiska iyo tumista cuudka, qaabka Soomaalida, ayaa gayeysiiyey garsooyaasha inay ku dhawaaqaan inaan kaalinta koowaad galay.

**AIS: Waxaan filayaa kolkaas in waalidkaagu noolaayeen?**

X: Waa run.

**AIS: Siday uga falceliyeen jihada ay u socdaan xiisahaaga iyo noloshaadu?**
X: Waanu is dagaallay—kulankayaga waxaa dhextaal u ahaa khilaaf. Tooda kolka la eego, waxay la ahayd in wiilkoodu noloshiisa duminayo iyada oo weli curdin ah. Waad dareemi kartaa, labadooduba way necbaayeen, oo yasi jireen, waxan aynu fanka ugu yeedhno.

**AIS: Sida muuqata, guud ahaa Soomaalida da'dooda ah ayay arrintaa kala sinnaayeen, iyo xataa lodad kale oo ka dambeeyey, waxayna aamminsanaayeen in mustaqbalka fanku uu yahay guuldarro iyo sumcadxumo bulshada dhexdeeda lagala kulmo?**

X: Haa!

**AIS: Wakhtiyadii dambe marna fekerkooda ma baddeleen?**

X: Weligood ma ay beddelin, xaqiiqatanna waxay geeriyoodeen iyaga oo aan ku qanacsanayn waxa ay u arkayeen nasiibkayga xun. Nasiib wanaag se, siday doontaba haw dhacdee, adeerkay ayuu wakhtigu ku simay inuu xukunkiisa ka noqdo oo, dabadeed, ii duceeyey.

**AIS: Waa arrin naxdin leh, farxadina aysan ka maqnayn! Xilligan aynu ka hadlaynnaa waa hadma? Dagaalkii Labaad ee dunida ka dib miyaa?**

X. Haa, waa Dagaalka ka dib uun. Waa kolkii Belwadu hees ahaan iyo muusig ahaan uga soo muuqatay degaanka Soomaalida.

**AIS. Xillima ayaad Cadan ka tagtay?**

X. Markii ugu horreysey 1949-kii ayaan ka tegay. Sababta qudha ee aan uga tegayna waxay ahayd in layga maqlo Idaacadda Hargeysa oo cusbayd. Halkaas markaan imi waxaa durbaanka u tumi jirey xiddiggii soo baxayey ee Cabdillaah-Qarshe. Debin ka dib, waxaan ku noqday Cadan. Marxaladdan noloshayda ah, awooddayda ku-hadalka Af Soomaaligu bilow, iyo mid hoosaysa, ayay ahayd. La-dhacsanaantayda fanka ayaa keentay inaan la qabsado habboonida iyo hodantinnimada Af Soomaaliga. Intaa waxaa dheerayd, heesihii siyaasiga ahaa ee xilligaasi waxay ahaayeen kuwo i xiisaggeliyey, oo sidaas awgeed, dhaqanka i dhexgeliyey.

**AIS. Hargeysa, waxaad joogtey muddo, dadadeedna adigoo faraxsan ayaad Cadan ku noqotay?**

X. Haa. Markaan Cadan joogey, waxaan ka qaybgalay tartan ku saabsan laxamaynta heesaha gobannimada ee loogu talaggalay xafladda weyn ee 1960-ka. Laxammadaydii waxaa loo diray Hargeysa. Waad og tahay, kolkii lagu dhawaaqay xorriyaddii Maxmiyadda Ingiriiska, xafiiskii gumaysiga ee Biritishka ee Cadan ku yaalley ayaa isku soo dubbaridey xaflad cajiiba, oo kaba weyneyd middii Hargeysa lagu dhigay. Xilligaas, Md. Maxamed Xaashi Cabdi, oo ahaa sarkaal ka tirsanaa Idaacadda Hargeysa, ayaa Cadan loo soo diray. Qaar ka mid ab bulshadii halkaas degganeyd ayaa Md. Cabdi ku qanciyey inaan ahay nin dhallinyaro ah oo ku habboon in uu ka qaybqaato xafladda calansaarka. Arrintani waxay ahayd tusaale ka mid ah buunbuunintii lagu yaqaanney Soomaalidii reer Cadan! Md. Cabdi wuxuu go’aansaday inuu duubo mid ka mid ah laxammadayda, wuxuuna u bixiyey ‘Dhalad’. Heestaasi waxay noqotay aqoonsigaygii koowaad, iyada ayaanan Hargeysa ugu soo guurey si rasmi ah.

**AIS. Sannadkii 1960-kii ayay ahayd markaa?**

X. Haa.

**AIS: Xaruntii iyo magaaladii aad degtay ayay halkaasi ahayd, sax?**

X: Haa. Markii aan imid Jamhuuriyaddii Somaalida ee cusbayd, judhiiba waxaa la ii qaatay shaqaale Idaacadda Hargeysa ka tirsan, iyo xubin ka mid ah fannaaniinteeda. Maxamed Xaashi Cabdi ayaa madax ahaa. Laakiin ninkii aan sida tooska ah u hoostagayey magaciisu wuxu ahaa Cabbaas Dhoorre.

**AIS: Gaadiid noocee ah ayaad Cadan ka soo raacday? Diyaarad?**

X. Maya, doon ayaan u soo raacay magaalada yar ee xeebta ah ee Maydh. Maalmahaas, waxaa jirey niman dhallinyaro ah oo wax waxbartay iyo rag xirfadlayaal ah oo Soomaaliyeed oo qabsaday dareenka bulshada Hargeysa. Si caannimadooda loo yareeyo, waxaa loo diray magaalada fog ee Dayaxa, oo Ceerigaabo u dhow. Raggaas waxa ka mid ahaa Cabdisalaan Xaaji Aadan, Xasan Cali Hinari, Kucaddeeye, Nayn, iyo kuwo kale.

**AIS. Yaa eryey? Gumeystihii Ingiriiska?**

X. Maya. Waxaa eryay siyaasiyiintii cusbayd ee Soomaalida ahaa iyo hoggaankii ganacsatada, kuwaas oo si uga xumaaday nimankan waxbartay caannimada ay ka heleen degaanka Hargeysa. Layliska loo diray nimankan dhallinyarada ahi wuxuu ahaa inay wax ka dhigaan dugsiga dhexe ee Dayaxa oo cusbaa, Cabdisalaan Xaaji Aadan ayaana looga dhigay maammule. Maydh markaan imid, guddoomiyihii haystey kastamka ayaa diray taar sheegaya inuu yimid nin dhallinyaro ah oo 'huud ku qaba' tumista cuudka. Reer Dayaxa si dhakhso ah ayay gaadhi—Laandaroofar—iigu soo direen. Markaan imid, waxay iga codsadeen inaan soo habeeyo masrixiyad. Dhawr toddobaad gudahood, waxaan isku soo dubbaridey riwaayad la odhan jirey *Magaalo*. Maalintii riwaayadda la dhigayey waxay ku beegantay xafladddi ayaanta ciidda. Waxaa munaasabadda lagu daray ciyaar kubbadeed oo aad u fiicnayd oo galabtii dhacday.

Guul ayay arrintani ahayd, sidaas awgeed, dhawr casho ka dib, waxaannu go'aansannay in aanu bandhigga geynno magaalada Burco oo tan ka weyneyd, oo galbeedka xigtey. Waxay ahayd markii koowaad ee taariikhda casriga ah Burco munaasabad faneed looga keeno meel bari ka xigta. Taas waxaa raacdey, in Burco laga badiyey ciyaartii kubadda cagta oo ay Ceerigaabo/Dayaxa ka badisay. Maaddaama ay jireen xifaaltan deggen iyo saaxiibtinnimo la isla fahansan yahay, labadii guulood reer Burco waannu kaga maadsanney. Kolkii hore arrintu si wanaagsan ayay ku bilaabantay. Laakiin munaasibaddu ku ma ay dhammaan farxad waartay. Ka dib markii xirfadlayaashii iyo dhallinyaradii, kuwaas oo ahaa dad fanka jecel, ay bilaabeen inay ii bogaan, ee dareenkoodu igu soo jeestay, waxoogaa hinaase ah ayaa galay fannaaniintii kale. Qaar ayaa xataa gaadhey heer ay cuudkayga subag ku daadiyaan! Waxay ahayd kolkii aan codeeyey beydadkan:
*Haddaanan ku cuslayn xaggaaga cidlaay*
*Ciirsilaay anna kaa caloolgo'ay!*

Muddo kooban ayaan Hargeysa joogey, dabadeedna waxaan tegay Jabbuuti, taas oo markaas uu Faransiisku gumaysanayey.

**AIS: Goorma, iyo sababma?**

X: Waxaan doonayey inaan arko meelo badan oo fanku uu sumcad ku lahaa. Waxay ahayd sannadkii 1961. Kolkan aan Jabbuuti aadey, bulshada Cafarta, in kasta oo aysan ahayn kuwo si fiican u diyaarsan fan ahaan, ayaa ahayd cududda siyaaseed ee ugu weyn. Laakiin fursadaha ayaa

badnaa. Waxaan dhex galay fankii iyo dhaqankii Jabbuuti. Fannaaniintii degaanka ayaa i weyddiiyey inaan ka caawin karo laxamaynta heeso ay ku darayeen riwaayad ay aad u doonayeen inay soo saaraan. Waan ka yeelay. Weriye meesha joogey ayaa i weyddiiyey inaan Af Cafariga aqaanno. In aanan aqoon ayaan u sheegay, laakiin waxaan kolkiiba u raaciyey in walaxdan looxa ah iyo xadhkuhu—cuudku—ay dhegahooda leeyihiin oo ay wax maqli karaan, waxna fahmi karaan. Maalintaas laga bilaabo, waxaannu yeelannay waxoogaa wadashaqayn ah. Bulshadii Soomaaliduna sidoo kale waxay ii soo dhaweeyeen si wanaagsan. Laakiin ka dib markaannu samaynnay dhowr heeso siyaasadeed ah oo caan noqday, kuwaasoo aniga la ii yaqaanney, madaxdii gumaystaha Faransiiska ayaa naga shakiyey oo nagu kacay, kaas oo, isla kolkaas, meesha iga soo eryey.

**AIS: Miyay xilligan Jabbuuti joogeen fannaaniin la yaqaannaa? Haddii ay jireen, yay ahaayeen?**

X: Dhowr baa jirey. Ragga caanka ah ee joogey waxaa ka mid ahaa Md. Siciid Xamarqoodh. Xagga muusigyahannada, waxaa jirey nin dhallinyar ah oo la odhan jirey Ibraahim Bay oo Soomaali-Suudaani ahaa, oo uu Nahaari u ahaa abti. Waxaa sidoo kale joogey dhawr muusigyahan oo Carab-Jabbuutiyaan ah.

**AIS: Intee in le'eg ayaad Jabbuuti joogtey?**

X: Toddoba gu’ ayaan joogey lixdamaadkii. Mar dambe, waxaan haddana Jabbuuti ku noolaa kow iyo toban sano—marka la isu wada geeyo 18 sano—taas oo ka badan wakhtigii aan ku qaatay Jamhuuriyadda Soomaalida.

AIS: Kolka hadma ayaad Soomaaliya ku soo noqotay? Miyay ka horreysey xornimadii Jabbuuti?
X: Xaqiiqatan, Faransiiska ayaa i soo eryey, sidaas awgeed baan Hargeysa ugu soo noqday, aniga oo aan ku tashan. Halkaas, waxaan isku dubbariday riwaayad magaceedu ahaa *Macalcune Muuqan Doonee*. Dhowr macallin ayaan ku talaggalay inay ka qaybqaataan. Waxa ka mid ahaa Maxamed Warsame, Faysal Cumar, Maxamed Mooge iyo Abu Shiraac.

**AIS: Ma guulaysatey riwaayaddani?**

X: Aad iyo aad!

**AIS: Intee in le'eg baad Hargeysa joogtey?**

X: Ilaa saddex bilood. Masrixiyaddaas waa la duubay, kaydkeediina, waxaan filayaa, inuu haddaba sii jiro oo la heli karo.

**AIS: Yay ahaayeen fannaaniintii iyo muusigyahannadii Hargeysa xilligaas joogey?**

X: Waa dabayaaqadii 1960-kii. Waxaa ka mid ahaa qolo hibadoodu yaab lahayd: Maandeeq,

Magool, Iftin, Guduudo, Baxsan, Farxiya Cali, Hibo-Yar, Maxamed Saleebaan, M. Mooge, Axmed Mooge, Maxamed Yuusuf, Maxamed Axmed, iyo Cabdillaahi Gujis. Muusig-tumayaasha waxa ku jirey Cali Fayruus, Maxamed Siciid, Maxamed Cige, Maxamed Afweyne, Cali-Dheere, Cali-Xamari—ninkaa ugu dambeeyaa wuxuu si yaab leh u tumi jirey aaladda foodhida.

**AIS: Markaad barbardhigto xarumaha kale ee fanka Soomaalida, sida Muqdisho iyo Jabbuuti, siday markaa ahayd hibada reer Hargeysi?**

X: Si guud marka loo hadlo, markay timaaddo xagga laxanka, iyo dabadeed muusig-samaynta, waxaan aamminsanahay inay Soomaalida koonfureed aad ugaga fiicnaayeen. Bal waxaad xasuusataa uun mucjisadii Xuseen-Baajuuni iyo Axmed-Naaji Sacad, haddii aanay ahayn lodka dambe oo uu hoggaaminayo mucjisada cuudka, Daa'uud Cali Masxaf.[2] Laakiin marka ay timaaddo dhinaca samaynta maansada iyo heesidda, Soomaalidii waqooyiga iyo Hargeysa ayaa kaga fiicnaa. Hargeysi kolkan waxay ahayd magaalo-madaxda.

**AIS: Maxaad u malaynaysaa sababta?**

X: Ma hubo, maaddaama oo aanan si buuxda u baadhin sida ay u kala duwan tahay hibada faneed, laakiin aragtidayda ayaan ku siinayaa. Soomaalida waqooyigu waxay ahaayeen caado ahaan dad guurguura (xooladhaqato). Sababtaas awgeed, waxaa yaraa dareenkooda ku celcelinta iyo dhiraandhirinta muusigga. Xagga koonfurta markaad eegto, maaddaama ay ahaayeen dad inta badan deggen, waxaa laga yaabaa in arrintaasi ay siisay jewi ay wax ku ikhtiraaci karaan, kuna celcelin karaan. Si aad loogu sii eego, arrintan waxay u baahan tahay deraaso dheeraad ah inay aqoonyahanka da'da yar ee Soomaalidu ka sameeyaan.

**AIS: Hargeysa, kolkan, kuwee bay ahaayeen hal-abuurrada ugu caansani?**

X: Safka hore waxa kaga jirey niman aan cidna la barbardhigi karin oo ay ka mid ahaayeen Xuseen Aw Faarax, Ismaaciil Aw Axmed, Yuusuf X. Aadan, iyo Cali Sugulle.

---

[2] Waan qirayaa go’aanka saddexdaa muusigyahan ee reer Koonfureed. Dhawr tobanle ka hor, mar aan weriye idaacadeed oo da’ yar ka ahaa raadiyaha qaranka ee Muqdisho, waxaan u soo taagnaa munaasibado badan oo ay Xuseen-Baanjuuni iyo Axmed-Naajiba ay qalabbo kala geddisan tumayaan. Jiibta iyo jaanta ayay isla heleyeen, siiba markay tumayaan cuudka.

Diseenbartii hore (ee 2007), mar aan xaashiyo aqoomeed ka soo jeedinayay 30-guuraadii Ururka Caalamiga ah ee Deraasaynta Soomaalida, oo lagu qabtay magaalada Jabbuuti, waxaan gallad gaar ah u helay in la igu martiqaado oo aan galab iska dhan iyo qayb fiidkii ah (in ka badan toddobo saacadood) ku soo qaato guriga Cabdinuur Allaale, isagoo uu na la joogay Daa’uud Cali Masxaf. In kasta oo aan hore cido kale uga maqlay iyagoo Daa’uud wanaag ka sheegaya, markii kowaad ee aannu si shakhsi ah u kulanno ayay ahayd. Cabdinuur ayay wacnaantiisu gaadhay heer uu kulanka noo soo qabanqaabiyo. Wuxuu kulankaa qaaciga ah ee koobani muujiyay dheeraadka ay leedahay in la isla helo Cabdinuur oo qaadaya heesihii Qaraamiga iyo Daa’uud oo cuudka tumaya. Wuxuu ahaa iskuddar heer sarreeya. Awoodaha Daa’uud waxay ahaayeen ashqaraar—wuxuu ka tumayay xadhko jaadgooni ah iyo qaab ku duufsanaya oo qofkii dhegaysta ku qaadaya in uu u maleeyo in uu dhegaysanayay iskudhaf ah cuudkii soojireenka ahaa iyo giitaarka korontada ku shaqeeya. Maankaygu wax su’aal ah ka ma qabo in uu yahay ciyaartoy heersare ah iyo in uu ka qayrkii ka mudhay. Waqti iyo muu ahaa! Cajaladdii aan ka duubtay iminka kaydkayga ayay ka mid tahay oo aan had iyo jeerale dhegaysto oo qaddariyo. Ugu danbayntii, waxa iyaduna muhim ah in la xuso in Daa’uud uu sidoo kale leeyahay luuq faseex ah, soojiidasho leh oo miisaaman. Si u dareemo macallinnimada cuudka iyo luuqda ee Daa’uud, waa in qofku dhegaystaa isaga oo heesta *Daalo* la qaadaya fannaanadda mar-la-aragga ah ee Maandeeq.

***

**AIS: Lixdamaadkii, sideed u cabbiri kartaa xidhiidhka ka dhexeeyey fanka iyo siyaasaddii gumaysiga ka dib?**

X: Sannado yar ka dib 1960-kii, xummaddii waddinayddu waxay bilowday inay shiiqdo. Qofku wuxuu dareemi karey in dabayl qaboobi ay maashaynayso xammaasaddii bulshada. Waxay u muuqatey sidii inaynu gallay wakhtiga bisha malabka (shahrul-casal) ka dambeeya, taas oo u muuqatey in la beerdarraynayo wakhti u eeg inuu xambaarsan yahay fursado aan la koobi karin. Waxa la maqlay heeso dawladda ka soo horjeeda. Heestii ugu horreysey ee nooca heesaha mucaaradka ah waxaa sameeyey abwaankii caanka ahaa ee [Maxamed C. Xuseen] Huryo.

**AIS: Maxay ahayeen arrimahii udubdhaxaadka u ahaa waxyaabaha ay fannaaniintu diiddanaayeen?**

X: Kolkii hore, arrimaha la isku hayey waxay iska ahaayeen kuwo aan sii ridneyn. Waxay la xidhiidheen fekrad ay qabeen dadka qaar oo ahayd in saamiqaybsiga xubnaha wasaaradaha dawladda beelaha qaar laga sedbursadey. Laakiin waa la dareemi karey inay soo socoto khatar weyn oo ah inay bilaabmayso inay umadda isu bahalagelinayaan rag u jeelqaba inay qasab dadka isku baraan. Weli se dareenkan [ah in dadka la isu bahalageliyo] bulshada dhexdeeda saamayn ba’an kuma uu lahayn, qaar badan oo naga mid ah ayaana sidaas u arkayey.

**AIS: Haddii, sida aad caddaysay, qasab-isku-muujinta siyaasiyiinta xildoonka ahi aysan saamayn badan ku lahayn, maxaad u malaynaysaa in dimuqraaddiyaddii iyo habraacii dastuurku uu u jirey muddo sagaal sano oo keli ah (1960 - 1969)?**

X: Axmedoow, adiga iyo jaalkaaga wakhtiga badan ku bixiyey baadhidda isbeddelka bulshada Soomaaliyeed ee wakhtiyadii dambe, ayaa ku habboon inay ka jawaabaan su'aashan aadka u adag. Illow se, siday aniga ila tahay, waxaan filayaa inay jireen dhowr arrimood: filasho xad-dhaaf ah iyo doonidda hanti aan la xoogsan, taas oo dhaawacday dhiirranaantii, ruuxdii iyo maskaxdii hal-abuurka lahayd. Tani waxay ahayd dingiin goor hore ah: haddii, dad ahaan, aynnaan gobannimadii u arki lahayn cutub bilow u ah safar dheer oo adag iyo waddan-dhis, mustaqbalku wuxuu noqon lahaa mid niyadjab leh. Laakiin dad yar uun baa arrintan dareen siiyey, inta kale oo dhan waxa lagu suuxiyey dhacdhar yar oo ay bixiyeen nidaamka siyaasadeed ee cusbaa; gaar ahaan, deeqo ka iman jirey waddamada dibadda. Kolka la soo koobo, caadiyaynta maskax-yarida musuqmaasuqa ayaa gedaftay fankii bulshada, kaas oo dhegaystayaashii u raray waddaninnimo iyo ficil. Madaxweyne Aadan Cabdille Cismaan iyo Ra'iisalwasaare Cabdirisaaq Xaaji Xuseen waxay si adag isugu dayeen inay diidaan, iyagoo tusaalaynaya hoggaamintooda, garaad-xumadii soo baxaysey, taas oo ragannimadii ka dhigtay bililiqaysiga hantida umadda. Aadan iyo Cabdirisaaq waxa lagaga adkaaday doorashadii 1967-kii. Hoggaamintii qaranka waxa la wareegay, iyadoo dastuurka la raacayo, Madaxweyne

Cabdirashiid Cali Sharma'arke iyo Ra'iisalwasaare Maxamed Ibraahim Cigaal. Dawladdan cusubi waxay ahayd mid dul badan u leh musuqmaasuqa oo halkii ugu sarreysey maraya.

**AIS: Marka, waxa taladii dalka lagu qabsaday afgembigii millateriga ee uu Siyaad Barre hoggaaminayey, ka dib markii la dilay Cabsirashiid Cali Sharma'arke, bishii Oktoobbar 1969-kii. Siday ahayd xaaladda iyo falcelinta fannaaniinta ee ku aaddan dhacdadan aan loo tooghaynnin?**

X: Naxdin iyo riyaaq si yaab leh isugu milan ayay ahayd! Waxaa la dareemay naxdin kolka la eego dilkii argaggaxa ahaa ee Cabdirashiid, farxadna waa la dareemay marka la eego dhinaca xukunkii ay dadku naceen oo dhammaaday. Markii Kacaanku cagadhigtay, fankii Soomaalidu wuxuu bilaabay in uu noqdo shay ay dawladdu dareenkeeda ku jeediso, dhaqaalana ku bixiso. Markii kowaad ayay dhacday in fannaaniinta la siiyo fursad caalami ah oo ahayd in loo diray Bariga Dhexe, Aasiya iyo meelo Afrika ka mid ah, si ay masrixiyado ugu soo dhigaan. Intaas waxa dheeraydd, shaaqalayn cusub ayaa la bilaabay, sidoo kalana qalab cusub ayaa la keenay. Waxa ugu weynaa, dhisiddii tiyaatar heersare ah oo casri ah, kaas oo ay ku deeqday Jamhuuriyadda Bulshada ee Jayna, oo laga dhisay badhtamaha Muqdisho. Fannaantii oo dhan, derajaday doonaan ha lahaadeene, ayaa arrintan ku farxay, si la barbardhigi karo uun sidii la loogu farxay markay gobannimadu dhalanaysey.

**AIS: Maxaad u malayn kartaa in millaterigu u sameeyey waxqabaddadan aadka ah?**

X: Runta kolka la sheego, arrintani Golaha Sare ee Kacaanka ka ma ahayn oo qudha yool lagu soo noolaynayo dhaqanka umadda. Waxaan filayaa arrintaa inuu sabab u ahaa saamayntii jaallihii Golaha Sare ee Kacaanku, waa Midawgii Soofiyeeti. Dhaqanka oo laga dhigo il dacaayadeed—si taliska cusub ee Soomaaliya loogu yeelo muuqaal waddaniyadeed oo sooc ah—waxay ahayd ujeeddo weyn, Soofiyeedka ayaana ahaa cidda ka dambaysa in xoogga la saaro khayraadka dhaqanka, si loogu taageero awoodda iyo sharciyayta Golaha Sare ee Kacaanka. Halkan kolkaynu maraynno, waxaan rabaa inaan ku daro in maammulkii Jaynahu ay, si ay ahaydba, ka shanqadh yaraayeen; waxaan ka wadaa, ma ay jeclayn inay xidhiidhka ku saleeyaan oo qudha danta Jamhuuriyadda Bulshada ee Jayne. Waxay daacad ka ahaayeen kor-u-qaadidda fanka Soomaalida.

**AIS: Macquul ma tahay marka la eego xaqiiqada ah in Golaha Kacaanku uu hirgeliyey qorista Far Soomaalida, oo ay suugaanyahankuna lahaayeen doorka muhiimka ah ee samaynta maansada, in la yidhaahdo taageeridda GSK waxay ahayd mid horumar leh?**

X: Waa laga yaabaa, laakiin waxaa jirta arrin intaa dheer oo aad u baahan tahay inaad xusto. Waad og tahay, markii uu in yar jirey GSK, abwaankii weynaa ee Xuseen Aw Faarax ayaa hees soo saaray: *Ii Sheeg Maxaan Qoraa?* Waxaa ku xigtey riwaayaddii *“Af Qalaad Aqoontu Miyaa?”* oo uu sameeyey nin aan isaguna ka dhicin, Cali Sugulle. Cadaadiska dhabta ah ee cusboonaysiinta dhaqanku wuxuu ka imanayey fannaaniin badan, ha ahaadeen qaar sida Xuseen

iyo Cali la yaqaanno, ama qaar ka caannimo yar oo curin karey beyd ama laba. Fannaaniintii nooc walba lahaa waxay ka daaleen noloshii xilligii rayidka ee caajiska ahayd. Markii isbeddelku dhacay dabayaaqadii 1969, waxay kicisay xammaasad hal-abuur oo heer-qaran ah, GSK wuxuu fahmey inuu majaraha u qabto dareenka xooggan ee dadka si uu u leekaysiiyo dantiisa siyaasadeed. Sababtaas awgeed, casuumaddu way u wada furnayd maansayahannada, muusigyahannada, heesaaga iyo riyaawad-curiyayaasha.

**AIS: Dad badan baa qaba in sannadihii 1969-1978 uu fanka Soomaalidu gaadhay figtii u sarraysay. Miyaad ku waafaqsan tahay?**

X: Aad iyo aad! Waxaad mooddaa in aanu fanku waqti kalaba lahayn, xaqiiqdiina aanay waxba ka danbayn.

**AIS: Goormuu karaarjabay?**

X: Sidaan qabo, dhibtu waxay ahayd hoggaankii Golaha Sare ee Kacaanka. Xiddigtii Siyaad Barre ee lagu caleemasaaray in uu yahay hoggaamiye weyn oo soo baxay waxay ku shiiqday saddex munaasibadood. Ta kowaadi waxay ahayd markii badhtankii 1970meeyadii la asaasay Xisbigii Kacaanka Soomaaliyeed. Halkii uu ka ahaan lahaa foolaadka Golihii Sare ee Kacaanka ee ka koobnaa saraakiisha labaatameeyada iyo dhiidhiida ah, Xisbiga Kacaanku wuxuu noqday cuf weyn oo soo giraangiriyay qulqulatooyin aan la maarayn karin iyo dano fara badan—duruufo badan oo adag oo aanu qofna ka dabbaalan karin. Ta labaadi waxay ahayd maalintii uu saxeexay dagaalkii Itoobbiya (1977), oo uu taliskiisii mar kale jilbaha u dhigay. Ta saddexaadna waxay ahayd markii la jebiyay ciidankii Soomaaliyeed (1978) ee aanu Siyaad Barrana istiqaaladdiisa umadda u soo gudbin, sharcinnimadiisiina markaas ayay uumibbaxday. Lacalla haddii uu, jabka ka dib, umadda Soomaaliyeed waydiisan lahaa talo ku saabsan halka meeshaas looga dhaqaaqayo, waxaan ku kalsoonahay in aqlabiyad badani ay ku baarigi lahayd in uu sii joogo. Waa waqtiyada dhifta ah ee tijaabada adag marsiiya hoggaanka.

**AIS: Marka la eego intaa sare iyo niyadjabka ummadeed ee bilawday, sidee bay fannaaniintu uga falceliyeen**?

X: Heerka wacyi ee loo leeyahay waxa dhacayay, si caadi ah ayaanay dhexdayada uga sinnayn. Anigu, shakhsiyan, waxaan goostay in aan meerisyo u diro Agaasimihii Hayaadda Nabadsugidda Soomaaliyeed (NSS). Waxay u dhignaayeen, "*Aaway doobigii xoorku dusha ka marayay; iyo dooggay warka noogu darayeen?"* In yar ka dibba, madaxii NSS-tu wuxuu ii soo diray farriin uu iigu gooddinayo haddii aanan joojin carqaladda caynkaa ah, in ay dhulka la geli doonaan sumcadda aan Soomaalida ku dhex leeyahay. Hanjabaad ayay ahayd waxaasi e, may ahayn hoggaamin, waxaanay calaamad u ahayd sumadda baadisoocda u noqotay nidaamka maamul ee taliska.

***

**AIS: Iminkana waxaynu u gelaynaa 1980meeyadii. Maxaan weli maskaxdaada ka guurin?**

X: Jihada uu fanku u jabay waxay isugu biyashubatay libaax-ka-dhigista Siyaad Barre. Waxa si isa soo taraysa xaaladda uga baxay dhammaan haayadihii dawladeed, sida Golihii Sare ee Kacaanka, kaalintoodiina waxa buuxiyay Siyaadayn la buunbuuniyay. Burjigan shakhsiyadeed ee wiswiska lihi wuxuu badhkayo nagu qaaday in aannu si iskayo ah isu tarxiilno annagoon dalkana ka bixin. Anigu, tusaale ahaan, waxaan goostay in aanan Tiyaatarka Qaranka ka ag wareegin, oo labo bilood mushaharkaygii maan doonan. Weyraxaygii wuu ka sii daray, waxaanan 1983-dii mar kale aaday Jamhuuriyadda Jabbuuti oo markan xor ah. 1986-dii ayuu Siyaad Barre yimi Magaalada Jabbuuti si uu ugula kulmo hoggaamiyihii xilligaa ee Itoobbiya, Mingistu Xayla Maaryan. Ujeedka kulanku, isagoo garab ka helaya Madaxweynihii Jabbuuti ee Xasan Guuleed Abtiddoon, wuxuu ahaa in la heshiisiiyo Jamhuuriyadda Soomaaliyeed iyo Itoobbiya. Galab ayaannu is aragnay Siyaad Barre. Wuxuu wax iga wayddiiyay sababta aan Jabbuuti ugu soo guuray. Waxaan u sheegay in Jabbuuti ay ii ahayd goob aan weligay degganaansho ka heli jiray, ayna tahay goobtii aan ku soo horreeyay intii aanan Muqdisho tegin. Wuxuu ii soo jeediyay in aan la laabto, balse waan ka cudurdaartay. Hasayeeshee waxaan siiyay talooyin ay ka mid ahayd in uu ka laabto siyaasadda qarriban ee uu rabey in lagu gubo beeraha qaadka ee Waqooyiga. Waxaan Siyaad u sheegay in mucaaradka hubaysan ee taliskiisa dalka debaddiisa kala soo dagaallamayaa ay aad u tiro yar yihiin. Hasayeeshee haddii uu ugu sii daro hagardaamo dheeri ah oo muwaaddiniinta la saaro, sida in beeraha qaadka la baabbi'iyo, waxay taasi keeni kartaa in fallaagada siyaasadeed ay xadhkaha goosato. Waxaan dareensanaa in aanu i dhegaysanaynba. Waxaan filayaa in uu iska dhaadhiciyay ammaanta guulwadaynta ah ee inta la caadaystay summad waxsoosaar oo rasmi ah noqotay, oo uu dabadeed gaadhay heer uu naftiisa u arko *Aabbihii Garashada*, oo ay guyaal badan ugu soo heesayeen biddayaashiisa iyo qabiilaystayaashiisa Muqdisho kula sugnaa.

**AIS: Waxaan filayaa in sharcidarrannimada taliska ee sii badanaysey iyo xaaladda nololeed ee muwaaddiniinta ee sii xumaanaysey ay fannaaniinta ku noqdeen culays aan laga baaqsan karin. Qodobkan ma faallayn kartaa?**

X: Waa run! Labo silsiladood oo maansooyin ah ayaa curtay. Mid waxa la odhan jiray *Siinley* (oo xarafraaca S ayay ku socdeen maansooyinku). Abwaanno ciiddaa iyo cammaarkaa ah ayaa ka qayb qaatay, oo mid kastaa wax ku lahaa. Waxay silsiladdu ka bilaabantay meeriska "*Saxarlaay ha fududaan.*" Waxay gaadhay meeriska, "*Dhulku waa sanqadhayaa; cagta saari maynee; socodkeennu xeel iyo; ha ahaado labo suul.*" Gebagebada *Siinley* waxay ahayd astaanta *naxashka*—oo u taagan dhimashada taariikhdii la wada lahaa! Dadka qaar baa u arka in curintani ay indhaha ku soo jeedisay baahida loo qabo in iskacaabbin run ah la isu abaabulo.

Silsiladda labaadna waxay ahayd *Deelley* oo iniinteedu ka soo abqaalantay gabay uu soo diray nin ka tirsanaa jabhaddii SSDF. Si uu u wiiqo in gabaygu cid helo, Siyaad Barre wuxuu isu keenay tiro abwaannadii waaweynayd ka mid ah. Waxa ka mid ahaa Gaarriye, Yamyam, iyo Hadraawi. Madaxweynuhu wuxuu awood u siiyay in ay gabaygaa u soo jawaabaan oo ay "suuqa ka saaraan." Gaarriye, oo erayga heli ogaa, ayaa u baalalleeyay oo "Odayga" indhihiisa oo

shaniyo toban ah bilaabay silsiladda. Gaarriye wuxuu ku bud dhigay, *“Dig dheh deelka maansada.”* Intii silsiladdaasi wareegaysey dhulka Soomaalidu ku filiqsan tahayna, dad badan ayaa ka qayb qaatay. Waxayna noqotay silsilad aad u dheer oo dhinacyo badan taabanaysa. Xataa aniga ayaa maanso ku darsaday, aan ku soo afmeeray “*aan ka tashanno.”* Dooddayda ugu muhiimsani waxay ahayd in aan qaranka oo dhan wayddiisto in naakhuudaha doonida qaranka loo daayo in uu shaqadiisa qabsado, innaguna aynu, innaga oo aan gacanta ka hadlayn, ka tashanno tallaabada xigta ee innala gudboon. Dabcan waad og tahay in aan taladaa la qaadan, dabadeed talo faro ka haadday ilaa xaaladdu gaadhay meeshii ugu darnayd abid.

AIS: Yaa ka mid ahaa fannaaniintii ugu muhiimsanaa tobanlahaa 1980meeyadii? Yaa calanwalayn jiray?
X: Mu’allifiinta waxa ugu horraynaya Hadraawi. Waxa soo raaca Gaarriye iyo Yamyam. Balse waa in sida oo kale la xuso shakhsiyadihii muddada soo taagnaa (ilaa bilawgiiba, dhawr tobanle ka hor), sida Cali Sugulle Duncarbeed, oo halabuurkiisu aad u sarreeyay aadna u fara badnaa. Munaasabad iyo mawduuc kasta oo lala soo qaadaba Cali Sugulle wuxuu awood u lahaa in uu wax ka soo tiriyo, weliba wax la majeerto. Wuxuu hibo u lahaa iswaafajinta cabbiraadda erayada iyo aragtida uu ka maansoonayo. Si kastaba ha ahaatee, sannadihii u danbeeyay tobanlahaa waxa karaar sii qaatay burburkii ku socday haayadaha dawladeed iyo bulshadaba, iyadoo ciidamadii dawladdu dhawr furimood kala dagaallameen mucaarad hubaysan. Bilawgii 1991, Muqdisho qudheeda ayaa gedoodday oo dhammaadkii taliska Siyaad Barre ayaa la suntay.

**AIS: Balse adigu xilli horaba waad ka sii xidhxidhatay Muqdisho iyo Jamhuuriyaddii Soomaaliyeedba, saw ma aha?**

X: Haa, oo sidaan hore u sheegayba waxaan Jabbuuti u dhoofay 1983.

**AIS: Yaad xilligaa Jabbuuti ka wada hawlgelayseen?**

X: Cid kasta oo ku shuqlanayd fan dhab ah. Sida runta ahna fannaaniinta iyo hoggaamiyayaasha Jabbuuti weligood aniga way ii wanaagsanaayeen—waxay ii lahaayeen tudhaale miidhan, martisoor iyo daryeel. Waqti xaadirkanna Jabbuuti aad bay uga duwan tahay Muqdisho: aad bay uga deggan tahay, uga furfuran tahay, ugana soodhawayn badan tahay.

**AIS: Yaa ka mid ahaa shakhsiyaadka faneed ee Jabbuuti kugu qaabbilay? Miyaad qaar ka magacdhebi kartaa?**

X: Shakhsiyaad qiimo sarreeya oo badan ayaa jiray. Waxa ka mid ahaa Maxamed Cabdillaahi Riiraash, oo ah nin aqoon gaar ah u leh taariikhda iyo dhaqanka Soomaalida; marxuun Ibraahin-Gadhle, oo macallin ku ahaa afka iyo suugaanta Soomaalida; Xasan Cilmi; Aadan Faarax; Shibbiin iyo qaar kale oo badan.

**AIS: Heesaaga isaga ka warran? Xilligaa miyay jireen fannaaniin reer Jabbuuti ah oo lagu calmado tayada luuqdooda?**

X: Way jireen shakhsiyaad madaxa la soo kacaya oo da'yar ahi, balse mandiqadda weli caan ka may noqon.

***

**AIS: Waqtigii ka danbeeyay 1991 ilaa hadda, oo 16 sano ka badan, waxa qaar innaga mid ahi ku qeexaan in uu yahay waagii wasakhda siyaasadeed ee gacankahadalka wadatey, oo waxa meesha ka baxay haayadihii dawladeed iyo ururradii. Fanka ka warran isaga? Isaga maxaa la soo gudboonaaday?**

X: Fanka Soomaaliyeed wuxuu maray isla masiirkaa qadhaadh—oo laga yaabo in carqalado kale isaga u sii dheeraayeen! Waxaana intii fanka ku shuqulka lahayd aad ugu daadatay, oo aqlabiyaddeedii u badatay, in qofku si quus ah keligii qalab yar u tunto, oo iska ah, sida Soomaalidu tidhaahdo, "calooshii-u-shaqayste."

**AIS: Ma waxaad leedahay lix iyo tobankaa sano cidina wax dareen ah u ma yeelan bayhoofka wadareed ama kan qarameed ee lagu jiray?**

X: Haa! Qof kastaa marag buu u ahaa xumaatada isa soo taraysey iyo sida markii danbe haybtii qarameed u iilgashay. Iyada oo ay sidaa tahay, anigu sida aan u arko, qaddiyaddii qaranka si kas ah baa cidla' lagaga tegay. Iyada oo la arkayo ayaa laga dhaqaaqay.
AIS: Markaa, dhuunyeedhiskii nidaamka siyaasadeed ee umadda waxa barbarsocdey liinbaxa fankii ummadeed?

X: Ha ka noqon! Waa in aad ogsoonaataa in waddaniyadda—(oo ah daljacaylka e aan ahayn madaxfalluuqa waddaniyadeed)—iyo baraarugga iyo tisqaadka ruuxda fanku ay si toos ah isugu xidhan yihiin. Anigana waxay iila muuqataa haddii midkood la dumiyo in ka kale si ba'an u hagaasayo. Intaan wax kalaba loo iman, fannaanku waayahaas oo kale wuu ku agoomoobaa!

***

**AIS: Iminkana waxaynu u gelaynaa fekerro qubane ah oo dhinacyo badan taabanaya. Markaan dib u milicsato kontonkaa sano iyo siyaadadaa, ilaa gobonnimadii, ee aad dhanka taariikhda ka eegto, yaad u aragtaa (adigoo ku salaynaya dhadhansigaaga iyo go'aankaaga) hablihii fannaaniinta ahaa ee ugu wanaagsanaa?**

X: Waxa jirey dumar aad u qaaya sarreeya, oo ay adag tahay in aan qaar magacaabo kuwana ka tago. Haddana, bacdamaa aad ku adkaysatay, waxa aan xusayaa Maandeeq iyo marxuumad Magool. Marka sida ugu yar loo qeexo, waxay ahaayeen ashqaraar!

**AIS: Mid kasta goonideeda ma u faallayn kartaa?**

X: Maandeeq waxay lahayd, ilaa haddana leedahay, luuqda ugu dabiicisan ee ugu hallaasisan; Magoolna, dhanka kale, waxay taqaannay sida loo heeso. Maandeeq waxay hibo u lahayd awoodda faneed ee aan wax loo dhigaa jirin, balse Magool waxay ku sara-martay dedaalka lexaadka leh ee ay gelisay xarakaynta iyo duduwidda luuqdeeda. Maandeeq luuqdeedu dabiici bay ahayd, Magoolna si aad u korran bay hawl u gelisay. Waxa sida oo kale muhiim ah in aan xuso Shamis Abokor (Guduudo). Waxay ahayd horseed, welina taallo ayay u tahay fannaaniinta. Intaa waxa dheer xiddigtii caqiibada lahayd, Caasha Cabdow. Marka Af Soomaaliga laga yimaaddo, waxay ku heesi karaysey Af Sawaaxili iyo Af Carabi iyada oo aan ka qaadayn dhadhanka iyo taabbagalnimada.

**AIS: Ka warran fannaaniinta ragga ah ee heer qaran?**

X: Mar kale, way badan yihiin, oo ma jeclaysanayo in aan kala saarsaaro. Haddana, bacdamaa aad ku adkaysatay mar kale, (Barafisoor Axmedow malaha hawl baad ila soo doonatay e!), waa kuwan dhawr magac oo xushmad loogu hayo Soomaali meel ay joogtaba: Maxamed Saleebaan, Cumar Dhuule, Maxamed Mooge, Maxamed Axmed, iyo Shimbir ayaa igu soo dhacaya. Hasayeeshee Maxamed Saleebaan ayaa ka sii sita dhammaantood, waxaana ugu wacan: wuxuu awood jaadgooni ah u leeyahay in uu qalcad hees ah oo dheer dhammeeyo isaga oo aan habdhaca neefsigiisa kala jebinayn. Wuxuu lahaa sanbabbo awood sarreeya sida fannaanaddii reer Masar ee weynayd, Ummu Kaltuun. Sida dhici jirtay, haddaad xabbad kabriid ah shiddo, Maxamed Saleebaan wuxuu awood u lahaa in uu inta istaago aanu mar labaad neefsan ilaa xabbaddii kabriidka ahayd basbeesho! Bal malee waqtiga ay intaasi ahaan karto? Wuxuu ahaa wax aynaan shaqo ku lahayn!

**AIS: Ka warran mu'allifiinta?**

X: Iyagu waa kala qaybo. Mu'allifiinta curiya heesaha jacaylka ah, waxa ugu sita marxuun Maxamed Cali Kaariye. Markay noqoto waayaha taariikheed iyo kuwa bulsheed ee culayskooda leh, Cabdillaahi Dhoodaan iyo sida uu Af Soomaaliga iyo fekradda gabayga u heli ogaa ayaa la mid dhigaysa abwaannadii waaweyn ee Raage Ugaas iyo Qamaan Bulxan lahaa. Dabcan, Hadraawi iyo Yamyamna waa hormuuddo. Cali Sugulle wuxuu gaar la yahay sida halabuurkiisu u loodsamo—wuxuu awood u lahaa in uu xilligaa wax ka curiyo oo noocaa dhegaystayaal ee hor tuban uu u golakafuulo. Sidaan hore u sheegayba, marxuun Xuseen Aw Faarax, oo ka mid ahaa mu'allifiinta ugu waaweyn, wuxuu awood u lahaa in uu masalooyinka siyaasaddeed ee muhiimka ah isu soo duwo oo ku ladho tayasarrayn iyo fahmid faneed oo hannaanaysan. Waxa isaguna jira, dabcan, Xasan Sheekh Muumin. Iyadoo lagu yaqaan dareengalkiisa akhlaaqeed iyo adduun-araggiisa mabda'aysan ee qaddiyaha maanta uu u leeyahay, wuxuu sidaa ku noqonayaa naaqidka dhaqanka casriga ah ee Soomaalida ee ugu gacanta kulul uguna afka fiiqan. Ma aha uun masrixiyad-curiye asal ah e, sida oo kale waa ma-baqde. Riwaayaddiisa, *Nebi Daayeer,* ee la dhigay xilligii Ra'iisalwasaare Maxamed Ibraahin Cigaal, waxay tusaale u tahay awoodda

curineed ee ina Sheekh Muumin. Sidoo kale waa qofka keli ah ee awoodda u leh dihnaanta halabuurnimo ee uu ku allifay riwaayad weyn oo labo majalladood ah.

**AIS: Cabdillaahi Cabdi Shube isaga ka warran? Halkee buu kaga dhacayaa xulkaa?**

X: Alla! Wuxuu ka mid ahaa mu'allifiinta ugu sita marka ay noqoto majaajilada. Waxa muhiim ah in la ogaado in hibadani ay dhif tahay, hodannimada Af Soomaaliga ee qaybtaa ku aaddanna aad loogu baahan yahay. Sidoo kale wuxuuu ahaa insaanka ugu kal san.

**AIS: Heesaha aad samaysay tee baad is leedahay way ugu sidataa?**

X: Waxaan filayaa Soomaalida taqaannaa in ay beri hore taa go'aan ka gaadheen. Waxay doortaan, aniguna aan ku raacsanahay, heesta *Uur Hooyo*. Waxa Af Ingiriisi u turjumay mutacallinka deraaseeya afka iyo suugaanta Soomaalida, Barafasoor Maartin Oorwin, oo ka tirsan Machadka Deraasaynta Afrikaanka iyo Reer Bariga ee Landhan.

***Uur Hooyo***

*Laba aabbe wada dhalay*
*Iyo ubad walaala*
*Arinkii yimaaddaba*
*Isla kaashanayoo*
*Isla kaashanaayoo*
*Iska siiya gacantee*
*Indhahaygu nuurkey*
*Ku il doogsadeenow*
*Adna haysku kay ladine*
*Uur hooyahaygow*

*Dhabarkii adoogeey*
*Kii laga abuurow*
*Naas iyo abaydimo*
*Kii ila wadaagow*
*Sideen kuu illaawaa*
*Ma ahaan karaysee?*

*Waayaha adduunkaa*
*Ina kala fogeeyoo*
*Anna kali ahaantey*
*U adkaysan maayee*

***Mother's Womb***

*You, the abundant light*
*That my eyes graze on*
*Do not take me lightly*
*You who shared*
*My mother's womb*

*You born of my father's back*
*Who shared the breast*
*We weaned from the same*
*I shall never forget you*
*Two born of a father*
*Children who are brothers*
*Who, whatever occurs*
*Help and lend*
*Each other a hand*

*The soul is a pledge*
*At the time of my death*
*It's you who'll place me*
*In the grave, and your hand*
*Throw the final soil*

*Umal baan la tiicaa*
*Is ma dhaabno madigee*

*Naftu waa ammaanee*
*Aaskayga geerida*
*Aday bud dhigaayo*
*Igu gacan dambeeye*
*Dhaxalkayga aadmiga*
*Kii ugu dhawaayow*

*My human inheritance*
*The one closest to me*
*The trials of the world*
*Have brought us apart*
*I cannot endure*
*Being on my own*
*I sway with melancholy*
*I'm no better off*
*Than a lone son.*

**AIS: Goormaad alliftay?**

X: 1967.

**AIS: Munaasibadda aad ku alliftayna?**

X: Hablo aannu walaalo nahay oo Cadan joogay ayaa soo dalbaday in aan idaacadda uga sii daayo hees Carabi ah oo uu curiyay mu'allifka Masriga ah ee Maxamed Cabdiwahaab, taas oo ka hadlaysey qaayaha walaalnimada. Markii dalabku i soo gaadhay, waxaan isku deyay in aan u raadiyo dhiggeedii oo Soomaali ah, balse waan ka soo quustay. Dabadeed waxaan goostay in aan mid u sameeyo walaalkay iga yaraa. Waxaan gacan ka geystay barbaarintiisii, dabadeed aad baannu isugu dhawayn.

***

**AIS: Imisa sano ayaad Landhan (London) degganayd?**

X: Waxa laga joogaa 12 sano markii aad iga caawisay in aan ka soo qaxo Jabbuuti oo aan iska soo dhiibo Ingiriiska.

**AIS: Ka warran waxqabadkaagii faneed? Weli miyaad waddaa? Miyay godolkaaga halabuurnimo ku hadheen wax lagaa maalaa (intaan qoslay)?**

X: (Inta uu muusooday), dabcan! Si xulasho leh ayaan weli cuudka u tumaa. Martiqaadyo badan ayaa dacal kasta iga soo gaadha, oo ka yimaadda Soomaali weli amateed daran u sii haysa tumista dhabta ah ee cuudka. Intaa waxa dheer in aan toddobaad kasta bixiyo casharro. Barafasoor Oorwin ayaa ka mid ah ardayda! Sida aad u jeeddo, labadaa cuud ee ku hor yaalla ayaa meel kasta ii raaca. Kan ku soo xigaana dhacdiyo baxdo wuu i ag yaallaa—waaba qardhaastayda! Waxa laga yaabaa in akhristayaashaadu xiiseeyaan e, 2005-tii ayaan allifay hees taabanaysa bedqabka dhulka oo dhan, ee aan Soomaaliya uun ku koobnayn. Waxyaabaha wanaagsan ee ay leedahay qurbajoognimada markeeda hore murugada miidhani waxa weeye in qofku aanu isu arkayn keli ah in uu qayb ka noqday bulsho cusub (marka aniga ay noqoto waa Ingiriiska e), ee uu sidoo kale isu arkayo in uu muwaaddin u yahay dhulka oo dhan. Heestaa waxa la dhahaa *Dhulka,* waxaana Af Ingiriisi u turjumay Barafasoor Oorwin.

***Dhulka***

*Qumbuladi haddii ay ku qarxayso*
*Dhagax la ridqay oo kaleetoo hadday ka dhigayso dhulka*
*Dhirtuna dhuxusha haddii ay noqonayso ooy buuruhu dhalaalaan*
*Dhimbiil iyo caleen iyo dhuub iyo*
*Midna dhogor la arki maayo*
*Dheddigiyo labood, dheddig iyo labood*
*Midna dhaafi mayso*
*Dharaartaas wixii dhaca kii dhihi lahaa*
*Ayaa dhigay?*
*Iyo kii lagu dhigi lahaa*
*Midna dhaafi maayoo*
*Yaynan dhaxal wareeginaa, yaynaan dhaxal hamaaninaa*
*Yaynaan dhaxal wada dhimanin*
*Buuqiyaha ha kaga dhawaajinina*
*Qiyaamaha ha soo dhoweynina.*

***Earth***

*The earth, the earth, the earth, the earth*
*If the bombs explode*
*If they make of the earth*
*Pulverized stone*
*If trees become charcoal*
*If mountain glow*
*The spark, leaves and bark*
*Will no longer be seen*
*Nor any living creature*
*Male and female will not be spared*
*The one who asks*
*"Who did it?"*
*And the one who is asked*
*Will not be spared.*
*Let us not all be disinherited*
*Let us not all come to an end*
*Let us not all die together*
*Don't make the trumpets sound*
*Don't bring the Day of Judgment near*

**AIS: Qurbaha miyaad iska heshaan saaxiibbadaadii fannaaniinta ahaa?**

X: Haa. Faadumo Qaasin, in kasta oo ay weli da' yar tahay, ayaa halkan joogto aadna ugu jajaban daryeelkayga. Waa heesaa kal san iyo qof arxan leh. Wiilkeeda, Maxamed, isaguna waa muusigiiste soo kacaya oo hibo leh. Maandeeq ayaa iyaduna ku nool magaalada oo aan marmar soo eegaa. Duniyo iyo Khadra Daahir iyaguna aad iiga ma dheera.

**AIS: Bal ka warran mustaqbalka fanka?**

X: Waxa lagu jiraa xilli adag, mustaqbalkana wanaag ka ma soo naasacadda. Facyadii da'yarta ahaana waxay badhtanka u galeen duruufta qurbajoognimo ee bilaa baadisooca ah iyo dhibteeda. In kasta oo ay jiraan shakhsiyaad dacallada ku filiqsan oo luuq wanaagsan leh, misana asalnimada ayaa ku yar allifaaddooda ama laxamayntooda Waxa laga yaabaa in tani ka mid tahay siyaabaha nabsiga burburkii qaranku u adeegto. Waa arxandarro. Fannaaniinta ila faca ah waxa qalbiyadooda cusleeyay urugada ay leedahay burburka kediska ah ee ku yimi taariikhdii aynu wada lahayn iyo waayidda aynu waynnay dhaxalkii dhaqameed iyo goobihii bulsho ee dhaladka ahaa ee lagu soo bandhigi jiray halabuurnimada faneed. Balse, ha ka yaabin in aannu is dhiibnay. Barista cuudka ee aan bixiyaa waa tallaabo yar oo lagala hortegayo raadka xun ee jabkaa ka yimi.

**AIS: Lix iyo tobankaa sano ee qalalaasaha qaran lagu jiray, ee qaxu hirgalay, miyay jiraan munaasibado yididdiilo ku geliyay?**

X: Haa! Labadan munaasibadood waadba xasuusan kartaa: 1995-tii waxaad iigu timi Landhan. Innaga oo koox yar ah, oo uu ina weheliyo fannaanka caqiibada leh ee Cabdinuur Allaale, ayaynu galab dhan iyo afar meeloodow saddex meelood oo habeenkii ah ku qaadannay subcinta heesihii Qaraamiga ahaa kuwoodii ugu debecsanaa. Aad baan ugu nefisay in aan cuudka tumo iyo in aan naaxiyadahaa kuu duubo. Horta weli ma haysaa cajaladdii?

**AIS: Aad iyo aad! Qolka deraasaynta ee gurigayga ayay taallaa oo waan ku celceshtaa. Waxay ahaayeen maalin iyo habeen aan la illaawi karin.**

X: Munaasibadda labaadna waxay ahayd markii aan booqday Machadka Macalester ee Mimisoota, bishii Julaay 2004. Adiga ayaa igu martiqaaday in aan keligay ka tumo hool muusigeed buuxa oo riyaaq leh oo ay joogto daawato badani. Waxa i taabtay karaamada labadaa habeen: daawato iskudhafan oo xamaasadaysan oo dhaqan wanaagsan, iyo masrax kaalay arag ah. Munaasibaddani waxayba i xasuusisay xilliyadii innaga lumay ee aynu Soomaali ahaan ahayn dad ku dhaata dhaxalkooda faneed oo maskax badan, kaaga sii darantana yaqaanna sida loo maamuuso dadkooda hibada leh. Tumista aan tumayay codkii Qaraamka ahaa ee *Beerdillaacshe*, ee uu allifay cabqarigii weynaa ee Cabdillaahi-Qarshe, waxay indhahayga ka soo daadisay ilmo aan la ila arkayn. Allow! Habeenno ma ahaayeen!

***

**AIS: Gebagebadii?**

X: Axmedow fanku wuxuu muraayad *u yahay* oo *ka yahay* bulshada. Markuu ugu wanaagsan yahay, fanku waa rabbaani—oo ka dhigan in uu waxtar iyo qurux leeyahay. Waa iskuxidhaha ruuxiyeed ee caqliga dadka iyo waaqaca hareerihiisa. Marka sidan loo dhigo, fanka iyo siyaasaddu qariib isku ma aha. Sida aan u arko, fanku sida dhabta ah wuuba ka jiraalsan yahay siyaasadda, sidaa darteedna wuxuu la tacalluqaa dhinacyada nolosha dadka, sidoo kalana wuxuu taabtaa nudaha dareen iyo caaddifadeed ee laga helo raynraynta dhaladka ah. Intaa waxa dheer, xataa halkan, khiyaalka faneed keli ah ma qorqoro adduun-araggeenna e wuxuu sidoo kale inoo soo bandhigaa suuraggalnimooyinka sida loo fahmo, looga hadlo, loogu riyoodo, ee loo fushado nolosheenna. Hummaagyada heerkan lagu gaadhaa waxay, ugu horrayntaba, ku xidhan yihiin hibada dheeraad ee fannaanka. Hasayeeshee gololo'a iyo laxanka ayaa lamahuraan ah. Sidaa awgeed, fanku sinna uga ma baaqsan karo siyaasadda, siiba waqtiyada culus. Dadka sheegsheega in suugaanta, dhaqanka iyo siyaasaddu aanay weligood is geli karin ama ay tahay in aan la is gelin, waa nacasyo ama waxa u qarsoon "ajandayaal siyaasadeed." Kuwa hore waa waxmagarato; kuwa danbana waa niyaxumayaal shar yuurura ah—waana aragti iyo ficilladii ka dhalanayay oo ay tahay in aynu ka feejignaanno. Marka la soo gaabiyo, fanku wuxuu ku san yahay cabbiridda habboonida quruxda waana afhayeen u hadla yididdiilooyinka wadareed ee horumarka ee isbeddelka keena.

Gabyaagii ugu weynaa bulshada Soomaaliyeed ee gumaysiga dabadii, Cabdillaahi Suldaan (Timacadde) ayaa siday tahay u dhigay labadaa dhinac. Ta danbe wuxuu dareemay oo inooga digayay ilaa iyo badhtamihii 1960meeyadii in damac cusub oo loo qaado walxo maaddi ah oo aan la kasban ay qiimatirayaan, haddaanayba ka sayidcalayn, maskaxda iyo nafsadda dhiirran ee sharafta iyo halabuurka leh ee reer magaalka Soomaalida. Waxay tani calaamadihii ugu horreeyay u ahayd cudurka haddeer ina wada galay: siyaasadda waallida iyo wejiggabaxa ah, fadhiidnimada iyo dawarsiga. Timacadde wuxuu sahamiyay higsi duwan: kaladdanbayn, tixgelin iyo xaqsoor. Sidaa awgeed, si kasta oo cimrigu u soo fadhi xun yahay, waxaan qabaa in fannaanku uu gacan ka geysan karo sookabashada wax ka mid ah ruuxdii bulshada ee dakaantay. Taas baa ila ah hawsha u taalla inta yar ee ka hadhay facaygii iyo dabcan kuwa naga danbeeyaba. Waxana laga yaabaa in aqoonyahannadiina iyo fannaaniintayadu aynu iska kaashan karno waarinta wanaagga faneed ee Soomalida kana shaqayn karno soonnoolaynta niyadda umaddeenna. Waxaanan u badinayaa in darka aqoonyahanka iyo kan fannaanku aanay sidaa u kala duwanayn.

**AIS: Keli ah ma tihid fannaan weyn e, waxaad sidoo kale u hadashay qaab aqoonyahan. Aad baad u mahadsan tahay, Macallin Xudeydi.**

X: Barafasoor Axmedow, waad ku mahadsan tahay fursadda.

**Maqaalkan ayaa ku soo baxay sanadkii 2009 – Bildhaan: An International Journal of Somali Stuides**